STATE OF WASHINGTON
DEPARTMENT OF SOCIAL AND HEALTH SERVICES
PO BOX 9501 OLYMPIA WA 98507-9501

# Oggaysiiska Lacag bixinta dheeraadka ah Ee Macamiilka

## Client Overpayment Notice

1. MAGACA IYO CINWAANKA MACMIILKA

| 2. Taariikhda: | 3. Lambarka Baaritaanka / OFA: |
|---|---|
| 4. Nidaamka Lacag-bixinta: Select one. | |
| 5. Qaybta Warbixinta: ama Tusmada Ururka AFRS: | |
| 6. * Lambarka Aqoonsiga Macmiilka Ee Nidaamka Lacag-bixinta: | |
| 7. Taariikhda Dhallashada: | |
| 8. Dooro mid kamid ah kuwaan soo socda:<br>a. ☐ SSPS. Waa in lagu soo lifaaqo Warqada Xisaabta Lacag-bixinta Dheeraadka ah ee Daryeel bixiyaha / Macmiilka ee DSHS 18-399 SSPS.<br>b. ☐ Aan-ahayn-SSPS. Waa in lagu soo lifaaqo Xisaabta Koodhka AFRS ee Lacag-bixinta Dheeraadka ah ee Daryeel-bixiyaha / Iibiyaha / Macmiilka ee DSHS 18-399A. | |
| 9. Lambarka Aqoonsiga ACES AU: | |
| 10. Lambarka Oggolaanshaha:<br>Khadka: Xarafka dambe: | |
| 11. ** Tilmaanta Adeega:<br>** Fiiri tilmaamaha loogu talogalay adeegaha "Baddan." | |

*** Fadlan u isticmaal Lambarka Aqoonsiga Macamiilka dhammaan lacag bixinada, waraaq isdhaafsiga, iyo wicitaanada teleefoonka.**

12. Waxaan ku siinay lacag dheeraad ah oo gaaraysa $ laga bilaabo ilaa .

13. Tani way dhacday sababtoo ah:

14. Sababta keentay lacag-bixinta dheeraadka ah: ☐ Macmiilka ☐ Waaxda
14.a. Iska-dhaaf xeerka xad-dhaafka (over-gross): ☐ Haa ☐ Maya

**Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan <u>qaddarka</u> ama <u>sababta</u> laguu siiyay lacag-bixinta dheeraadka ah, fadlan wac:**

| 15. Magaca Shaqaalaha: | 16. Lambarka Teleefoonka Shaqaalaha:<br>Email-ka: |
|---|---|

A. U dir jeeggaaga ama amarka lacagta, oo laga dhigay mid la siin karo "**DSHS** / **OFR**", ee loogu talagalay qaddarka lacag-bixinta dheeraadka ah ee adiga lagu siiyay:
Department of Social and Health Services (DSHS)
Office of Financial Recovery (OFR)
Client Enforcement Unit (CEU)
PO Box 9501 MS 45862
Olympia, WA 98507-9501

B. Haddii aad jeclaan lahayd in aad ka hadasho qorshaha lacag-bixinta, ka wac Xafiiska Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Dib-u-celinta Maaliyadda, Qaybta Fulinta Macmiilka, lambarkan:
(360) 664-5700 (Olympia)
1-800-562-6114 (Telefoon Lacag La'aan ah) Khadka Dheeraadka ah 16183
1-800-833-6388 (Adeegyada War-lalinta Gobolka Washington TTY)

C. Haddii aadan adigu bixinin weli waannu kaa qaadi karnaa. Tusaale ahaan, waxaan lacagta ka jaran karnaa jeegga mushaarkaaga, waxaan gudbin karnaa rahaamad ku qoran magacaaga oo ka muuqan karta warbixinta deyntaada, iyo/ama waxaan lacag ka qaadan karnaa koontada(koontooyinkaaga) bankiga.

D. Haddii aadan oggolayn sababta lacag-bixinta dheeraadka ah laguu siiyay, waxaad xaq u leedahay in aad wayddiisato dhageysiga dacwadaha maamul la xiriira, laakiin kaliya marka aad codsi qoroto. Waxaad haysataa muddo sagaashan (90) maalmood ah laga bilaabo marka aad hesho ogeysiiskan si aad u codsatid dhageysiga. U dir <u>codsigaaga</u> qoran, midkaas oo aad kusoo qortid Lambarka Aqoonsiga Macamiilka <u>bogg iyo warqad</u> kasta, adiga oo kusoo dira Codsiga Rasiidka Dib u celinta Boostada Shahaadaysan (CMRRR) ama adeeg kale oo keenid ah midkaas oo la daba gali karo, dhinaca: Office of Administrative Hearings, PO Box 42489, Olympia WA 98504-2489.

E. Haddii lacag-bixintaada dheeraadka ah la yareeyo ama la kordhiyo iyadoo ay sababtuna tahay natiijada Dhageysiga Maamulka la xiriira, xaq uma lihid xuquuqaha dhageysiga loo marayo Xafiiska Dib-u-celinta Maaliyadaha. Tixraac Amarkaaga Kama-dambeysta ah ee Xuquuqaha Rafcaanka. Haddii lacag-bixintaada dheeraadka ah la kordhiyay iyadoo ay sababtuna tahay isbeddel ay Waaxdu sameysay, waxaad leedahay xuquuqaha dhageysiga ee qaddarka korordhay oo keliya.

**Tilmaamaha loogu talogalay buuxinta Oggaysiiska Lacag bixinta Dheeraadka ah ee Macamiilka, Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada 18-398**

Baakad xiran oo buuxda oo ku saabsan lacag bixinta dheeraadka ee macamiilka waa in ay ka mid noqoto: a) foomka DSHS 18-398, Oggaysiiska Lacag bixinta dheeraadka ah ee Macamiilka; **iyo** b) foomka DSHS 18-399, Xisaabta Lacag bixinta Khaldan ee Adeega Bulshada **ama** foomka DSHS 18-399A, Aan ahayn-SSPS Macamiilka / Iibiyaha / Oggaysiiska Lacag bixinta dheeraadka ah ee Daryeel bixiyaha ee Lambarka Xisaabta AFRS. Dhammaan foomamka waxaa si toos ah looga helayaa internetka https://forms.dshs.wa.lcl/. Fadlan barta internet-ka ku qor dhammaan foomamka oo lifaaq iimayl ahaan ugu dir: clientop@dshs.wa.gov **ama** daabac kadibna adeegga boostada Gobolka ugu dir Xafiiska Dib –u-celinta Lacagta (OFR) lambarkan MS 45862 **ama** Adeegga Boostada Waddanka Maraykanka (USPS): OFFICE OF FINANCIAL RECOVERY, PO BOX 9501, OLYMPIA WA 98507-9501.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama u baahantahay caawimaad kale, iimayl u dir cinwaankaan: clientop@dshs.wa.gov

## A. Buuxinta foomamka lacag bixinta dheeraadka:

**Waa in la qoro. In la buuxiyo dhammaan meelaha banaan waa mid waajib ah.** Oggaysiisyada Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada waa in ay u matalaan Gobolka Washington qaab xirfadaysan. Oggaysiisyadu waa in ay ahaadaan kuwo u qalmo baahooyinka fikradeed ee Xafiiska Dib u celinta Lacagta iyo macamiilka sida in uu yahay oggaysiis deyn.

**HA dirin, ama siinin, nuqul ku saabsan lacag bixinta dheeraadka ah ee la siiyay Macamiilka. Xafiiska Dib u celinta Lacagta ayaa wuxuu ku wargelin doonaa deynta, kadib marka Xafiiska Dib u celinta Lacagta ay dejiso.**

1. Macaga iyo Cinwaanka Macamiilka: U sheeg ama usoo dir magaca iyo cinwaanka macamiilka sida uu ugu qoranyahay nidaamka lacag bixinta.
2. Taariikhda: Geli ama ku qor taariikhda Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada 18-398 ay samaysay ama dirtay faylka.
3. Lambarka Baaritaanka / OFA: Geli ama ku qor wax kasta oo lambarka Baaritaanka / OFA ah midkaas oo khuseeya lacag bixintaan dheeraadka ah.
4. Nidaamka Lacag bixinta: Geli ama ku qor ereyada lasoo gaabiyay ee nidaamka lacag bixinta midkaas oo loo adeegsaday in la sameeyo lacag bixinta asalka ah. Tusaale ahaan: **SSPS** (Nidaamka Lacag bixinta Adeega Bulshada), **IPOne** (Qofka ProviderOne), **SSBP** (Nidaamka Lacag bixinta iyo Adeega Biilka Bulshada) ama **P1Med** (Caafimaadka ProviderOne).
5. Qaybta Warbixinta ama Tusmada Ururka AFRS: Geli ama ku qor qaybta warbixinta ama tusmada ururka AFRS ee xafiiska oggolaaday lacag bixinta.
6. Nidaamka Lacag bixinta Aqoonsiga Macamiilka: Geli ama ku qor lambarka Aqoonsiga Macamiilka midkaas oo ay ku dhacday lacag bixinta dheeraadka ah.
7. Taariikhda Dhallashada: Geli ama ku qor taariikhda dhallashada macamiilka ee ah qaabka bisha/maalinta/sannadka.
8. Dooro khaanada la dooranayo midaas oo ah SSPS ama Aan ahayn-SSPS kuna dar warqada xisaabta arinta la xiriirta (18-399 ama 18-399A).
    a. SSPS - Saar calaamada sax khaanadaan haddii SSPS laga sameeyay lacag bixinta; foomka Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada 18-399 ee Adeega Bulshada Xisaabta Lacag bixinta Aan sixiixa ahayn waa in lasoo lifaaqo.
    b. Aan ahayn-SSPS - Saar calaamada sax khaanadaan haddii SSPS aanan samaynin lacag bixinta; foomka Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada 18-399A Aan ahayn-SSPS Macamiilka / Iibiyaha / Daryeel bixiyaha Oggaysiiska Lacag bixinta dheeraadka ah ee Lambarka Xisaabta AFRS ee aan ahayn-SSPS lacag bixinta dheeraadka ah waa in lasoo lifaaqo.
9. LAMBARKA AQOONSIGA ACES AU: Geli ama ku qor Lambarka Aqoonsiga ACES AU haddii la heli karo.
10. Lambarka Oggolaanshaha: Geli ama ku qor lambarka oggolaanshaha nidaamka sameeyay lacag bixinta. Geli ama ku qor ereyga “Multiple” “Baddan” haddii uu ku lug leeyahay wax ka baddan hal oggolaansho lacag bixinta dheeraadka ah kadibna ku qor dhammaan warqada xisaabta lacag bixinta la xiriirta (18-399 ama 18-399A).

    Lambarka Khadka Oggolaanshaha: Geli ama ku qor lambarka khadka oggolaanshaha nidaamka sameeyay lacag bixinta haddii la heli karo.

    Xarafka dambe ee Oggolaanshaha: Geli ama ku qor lambarka xarafka dambe ee oggolaanshaha nidaamka sameeyay lacag bixinta haddii la heli karo.
11. Sharaxaada Adeega: Bixi sharaxaad ku saabsan adeega la bixiyay. Geli ama ku qor ereyga “Multiple” “Baddan” haddii uu ku lug leeyahay wax ka baddan hal sharaxaad adeega ah lacag bixinta dheeraadka ah kadibna ku qor dhammaan warqada xisaabta lacag bixinta la xiriirta (18-399 ama 18-399A).
12. Tirada iyo Muddada Adeega Lacag bixinta: Geli ama ku qor tirada iyo muddooyinka-wakhtiga bilaabashada iyo dhammaadka ay dhacday lacag bixinta dheeraadka ah.
13. Sharaxaada Lacag bixinta dheeraadka ah: Sheeg sharaxaad kooban oo kusaabsan waxa sababey lacag bixinta dheeraadka ah.
14. Sababta keentay Khaladka Lacag bixinta dheeraadka ah: Dooro qofka sababay lacag bixinta dheeraadka ah ha noqdo “Macamiilka” ama “Waaxda”.

14.a. Iska-dhaaf xeerka xad-dhaafka (over-gross): Haddii lacag-bixinta dheeraadka ah ee macmiilka ay sabab u tahay kororka horey u dhaqangaley ee go’aaminta mas’uuliyadda macmiilka iyadoon kororka aan lagu muujin ACES iyo ProviderOne, dooro “Haa” haddii kale dooro “Maya.”

15. Magaca Shaqaalaha: Ku qor magaca khaanadan.
16. Lambarka Teleefoonka Shaqaalaha iyo Cinwaanka Iimaylka: Ku dar lambarkaaga teleefoonka tooska ah iyo cinwaankaaga iimaylka.

## B. Bedelida(Sixida) Lacag bixinta dheeraadka ah

Marka la bedelaayo lacag bixinta dheeraadka ah, HAKU qorin “Cancel” ama wax kale oo macluumaad far qoraal ah dusha ama kasoo horjeedka foomka Oggaysiiska Lacag bixinta dheeraadka ah ee hore. Buuxi foomka cusub adiga oo raaca tilmaamaha soo socda ee ku qoran qaybta A. ee sare. Isticmaal taariikhda maanta.

Gudaha Khaanada 13 kuqor: “Midkaan waa bedelida lacag bixintada dheeraadka ah taariikhdeedu tahay: bisha/maalinta/sannadka”, kadibna sharaxaad ka bixi sababta lacag bixinta dheeraadka ah bedelaad loogu samaynayo. Macluumaadkan waxay u caddeynaysaa shaqaalaha Xafiiska Dib u celinta Lacagta nooca deynta la bedelayo, waxayna macamiilka u noqonaysaa sharaxaad wanaagsan.